Filashooyinka ah goorta adeeg bixiyaha daryeelka qorshaha caafimaadka ku arki doono

Wakhtiyada sugida si loo arko adeeg bixiyaha ku xidhan baahiyaha daryeelkaaga. Arag wakhtiyada sugida si aad u aragto adeeg bixiye hoos.

- **Daryeelka degdega ah:** Waxaa la heli karaa 24-ka saac maalintii, toddobo maalmood usbuucii.
- **Daryeelka dhakhsaha ah:** Booqashooyinka xafiiska ee PCP-gaaga, Bixiyaha Habdhaqanka Caafimaadka, Rugta Daryeelka Degdegga ah, ama bixiye kale ee 24 saac gudahood.
- **Daryeelka joogtada ah:** Booqashooyinka xafiiska ee PCP-gaaga, Bixiyaha Habdhaqanka Caafimaadka, ama bixiye kale 10 maalmood gudahood. Daryeelka joogtada ah waa la qorsheeyay oo waxaa ku jira booqashooyinka bixiyaha joogtada ah ee dhibaatooyinka caafimaad ee aan ahayn kuwa degdeg ah ama kuwa dhakhsaha ah.
- **Daryeelka kahortaga:** Booqashooyinka xafiiska ee PCP-gaaga, ama bixiye kale 30 maalmood gudahood. Tusaalooyinka daryeelka ka hortagga ah waxaa ku jira:
 - Baadhitaanka sanadlaha ah ee jidhka (sidoo kale loogu yeedho baadhitaano)
 - Booqashada ilma fayo qaba
 - Daryeelka Caafimaadka Haweenka sanadlaha ah
 - Tallaalada (Tallaalo)

Nala soo xidhiidh haddii ay qaadato wakhti ka dheer wakhtiyada sare si loo arko adeeg bixiyaha.

Dheefaha uu daboolay Community Health Plan of Washington

Qaybtani waxay sharraxaysaa howlaha La ceymiyay ee Community Health Plan of Washington. Ma aha liistada dhammeystiran ee adeegyada la daboolay. Ka hubi adeeg bixiyahaaga ama nala soo xiriir haddii adeegga aad u baahan tahay uusan ku qorneyn. Waxaad ku arki kartaa dheefahayaga iyo adeegyada bogga chpw.org/member-center.

Qaar ka mid ah adeegyada daryeelka caafimaadka ee la daboolay waxay u baahan karaan oggolaansho hor u dhac ah. Dhammaan adeegyada aan la daboolin waxay u baahan yihiin oggolaanshaha hore. Adeegyada aan la daboolin dhexda Apple Health oo aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo waxay u baahan yihiin oggolaanshaha hore ee ka yimid HCA.

Adeegyada qaarkood waxay ku xadidan yihiin tiro booqashooyin ah. Adeeg bixiyahaagu waxa uu codsan karaa Xadidka Kordhinta (LE) haddii aad u baahan tahay booqashooyin badan. Haddii aad u baahan tahay adeegyada aan la daboolin, adeeg bixiyahaagu ha codsado ka reebida sharciga (ETR).

Waxaad u baahan kartaa inaad ka hesho tixraac PCP-gaaga iyo / ama horay-oggolaansho Community Health Plan of Washingtonka hor intaadan helin adeegyada qaarkood. Haddii aanad haysan gubdinta ama oggolaanshaha hore, waxaa dhici karta inaanaan bixin adeegyada. La shaqee PCP gaaga si loo habsado inay jirto oggolaanshaha hore meesha ka hor inta aanad helin adeega.

Adeegyada Guud iyo Daryeelka Degdegga ah

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeegyada Degdegga ah	Waxaa laga heli karaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii meel kasta oo Mareykanka ka mid ah.
Isbitaalka, Bukaankii-jiifka iyo Adeegyada Bukaankii-socodka	Waa inaan innaga u oggolaano dhammaan daryeelka aan degdegga ahayn.
Daryeelka Degdegga ah	Adeegso daryeel deg-deg ah markaad dhibaato caafimaad qabtid oo ubaahan daryeel isla mar ahaantaaba, laakiin noloshadu aysan ku jirin khatar.
Daryeelka Kahortagga	Ka eeg bogga 22.
Baxnaaninta Bukaankii-jiifka Isbitaalka (daawo jirka ah)	Waa inaan ansixinaa.
Tallaalada/ tallaalada	<p>Xubnahayagu waxay xaq u leeyihiin tallaalada bixiyahooda daryeelka aasaasiga ah, farmashiyahooda ama waaxda caafimaadka xaafadooda. Ka hubi adeeg bixiyahaaga ama la xidhiidh Adeega Macmiilka wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan jadwalka taxanahaaga tallaalka.</p> <p>Waxaad sidoo kale booqan kartaa Waaxda Caafimaadka doh.wa.gov/youandyourfamily/immunization si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.</p>
Xarun Kalkaalin oo Xirfadaysan (SNF)	La daboolo xili gaaban, adeegyada caafimaad ahaan lama huraanka ah. Adeegyo dheeraad ah ayaa la heli karaa. Naga soo wac lambarkan 1-800-440-1561 (TTY: 711).

Farmashiyaha ama Rijeetooyinka

Waxaanu isticmaalnaa dawooyinka la daboolay ee loogu yeedho Apple Health Liiska Dawada La door bidayo (PDL). PDL waa liiska dawooyinka ay daboosho Community Health Plan of Washington. Adeeg bixiyahaagu waa inuu qoro dawooyinka waa inuu kuu qoraa daawooyin ku jira PDL. Waad na soo wici kartaa oo weydiisan kartaa:

- Koobiga PDL.
- Macluumaad ku saabsan kooxda adeeg bixiyeyaasha iyo farmashiistayaasha sameeyay PDL.
- Nuqul ka mid ah siyaasadda ku saabsan sida aan u go'aansano daawooyinka la daboolayo.
- Sida loo waydiisto oggolaanshaha dawada aan ku jirin PDL.

Qaar ka mid ah xubin ku beeriada waxaa daboosha Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo. Naga soo wac lambarkan 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii su'aalo ah ama si aad wax badan ka barato.

Waa inaad daawooyinkaaga ka heshaa farmashiyga shabakadeena ee adeeg bixiyaha. Tani waxay hubsataa in dawooyinkaaga la dabooli doona. Nagu soo wac caawimada helida farmasiiga adiga kuu dhow.

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeegyada Farmashiga	Xubnahu waa inay isticmaalaan farmashiyada kaqeyb galaya. Waxaan u adeegsannaa Apple Health PDL. Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) si aad u hesho liiska farmashiyada.

Adeegyada daryeelka caafimaadka ee carruurta

Carruurta iyo dhalinyarada da'doodu ka yar tahay 21 sano waxay leeyihiin faa'iido daryeel caafimaad oo loo yaqaan Baaritaanka Hore iyo Xilliga, Baarista, iyo Daaweynta (EPSDT). EPSDT waxaa ku jira adeegyo badan oo baaritaan, ogaanshaha cudurka, iyo adeegyo daaweyn ah. Baaritaanadu waxay gacan ka gaysan karaan aqoonsiga jir ahaaneed, caafimaadka habdhaqanka ama baahiyaha daryeelka caafimaadka korniinka ee uu baahan karo baaritaan dheeraad ah iyo daaweyn.

EPSDT waxaa ka mid ah baaritaan kasta oo lagu ogaanayo cudurka iyo daaweynta caafimaad ee lagama maarmaanka u baahan si loo saxo ama loo hagaajiyo xaalada caafimaadka jidka ama dhaqanka. Tan waxaa ka mid ah adeegyada dheeraadka ah loo baahan yahay in la taageero ilmaha ee qaba daahida koriinka.

Adeegyadan waxay tahay ujeedadeeda in xaaladaha lagaga ilaaliyo inay ka sii daraan oo ay yareeyaan dhibaataada daryeelka caafimaadka ilmaha. EPSDT waxay goor hore dhiirigalinaysaa sii wadida helitaanka daryeelka caafimaadka ee carruurta iyo dhalinyarada.

Baaritaanka 'EPSDT' waxaa mararka qaarkood loo yaqaan ilmo caafimaad qaba ama baaritaan-daryeel oo wanaagsan. Carruurta ka yar da'da 3 ee u qalma baadhitaanada ilmaha fayada qaba ee jadwalka Bright Futures EPSDT, iyo da'da ah 3-20 waxay u qalmaan baadhitaanka ilmaha fayao qabka ah jadwalka taariikhda sanad kasta. Baadhitaanka ilmaha fayaha qaba waa inay ku jiraan kuwa soo socda:

- Taariikh caafimaad iyo koritaanka oo dhamaystiran
- Baaritaan buuxa oo jirka ah
- Waxbarashada caafimaadka iyo la-talinta oo ku saleysan da'da iyo taariikhda caafimaadka
- Tijaabinta aragga
- Tijaabada maqalka
- Tijaabooyinka shaybaarka
- Baadhitaanka kibriidka
- Dib u eeg cunnada ama dhibaatooyinka hurdada
- Baadhitaanka caafimaadka afka iyo adeegyada caafimaadka ee Helida Ilkaha ee Ilmaha yar iyo Ilmaha (ABCD) PCP takhasuska leh
- Tallaalada (Tallaalo)
- Baaritaanka caafimaadka Dhimirka
- Cudurka isticmaalida daroogada Baadhitaanka

Marka xaalad caafimaad uu ogaado dhakhtarka ilmaha bixiya, bixiyeyaha(yaashu) waxa ay:

- Daawee ilmaha haddii uu ku jiro inta uu le'eg yahay waxqabadka adeeg bixiyaha; ama
- U dir cunuga khabiirka ku habboon ee daaweynta, oo ay ku jiri karaan baaritaan dheeri ah ama qiimeyn takhasusle ah, sida:
 - Qiimaynta korriimada
 - Caafimaadka maskaxda oo dhameystiran
 - Qiimaynta khalkhalka isticmaalka maandooriyaha
 - La talinta nafaqada
- Adeeg bixiyaasha daaweynta waxa ay kula xiriiraan natiijooyinka adeegyadooda tixraaca bixiyaha (yada) EPSDT ee loo gudbiyey. Dhammaan adeegyada, ay ku jiraan kuwa aan la daboolin, ee carruurta da'aha 20 iyo ka yar waa in dib loo eegaa wixii caafimaad ahaan lama huraan ah.

Adeegyada dheeraadka ah waxaa ka mid ah:

Adeega	Xog dheeraad ah
Baaritaanka Ootismka	Waxaa loo heli karaa dhammaan carruurta 18 bilood iyo 24 bilood.
Toosinta daryeelka laf dhabarka	Loogu talo galay carruurta jirta 20 sano iyo wixii ka yar ee laga soo gudbiyay PCP.
Baaritaanka Korriimada	Baaritaannada ayaa loo heli karaa dhammaan carruurta 9 bilood, 18 bilood, iyo inta u dhexeysa 24 iyo 30 bilood.
Kalkaalinta Caafimaadka ee Waajibka ah (PDN) ama Barnaamijka Caafimaadka Carruurta ee Uruursan (MICP)	Lagu daboolo carruurta da'doodu tahay 17 iyo ka yar. Waa in aan ansixinaa. Dhallinyarada da'doodu tahay 18 illaa 20, tan waxaa daboolo Maamulka Gabowga iyo Caawimaada Muddada-dheer (ALTSA). Ka eeg bogga 46 macluumaadka laga helo ee la xiriira.

Habdhaqanka Caafimaadka

Adeegyada caafimaadka dhaqanka waxaa ka mid ah caafimaadka maskaxda adeegyada daawaynta isticmaalka maandooriyaha. Waxaanu kaa caawin karnaa helida adeeg bixiyaha haddii aad u baahan tahay la talinta, baadhitaanka, ama taageerada caafimaadka dhaqanka. Si aad u hesho adeegyadan, nagala soo xiriir 1-800-440-1561 (TTY: 711) ama ka xulo daryeel bixiye daliilka daryeel bixiyaha.

Adeega	Xog dheeraad ah
Taxliilinta Habdhaqanka la Adeegsaday (ABA)	Waxay ka caawisaa shaskhiyaadka qaba ootismka iyo naafonimada kale ee korriimada horumarinta wada xidhiidhka, xirfadaha habdhaqanka iyo bulshada.

Adeega	Xog dheeraad ah
Isticmaalka maandooriyaha (SUD) adeegyada daawaynta	<p>Adeegyada daaweynta SUD waxaa ka mid ahaan kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qiimaynta • Faragelin gaaban iyo ugudbinta daaweynta • Shaljsi qoys, iyo kooxda daawaynta • Bukaani socod, hoy, iyo bukaan jiid • Adeegyada daaweynta beddelidda Opiate (Afiyoonka) • Maareeyanta kiiska • Caawimaada dadka isku faca ah • Dhibaatooyinka Adeegyada • Maareynta kala noqoshada (ka saaridda sunta)
Daawaynta Caafimaadka Maskaxda	<p>Adeegyada caafimaadka maskaxda waa la daboolayaa marka ay bixiyaan dhakhtarka dhimirka, cilmi nafsiga, la taliyaha caafimaadka dhimirka ee rukhsada haysta, shaqaale bulsheed oo rukhsa leh, ama guur rukhsadaysan iyo dhaqtarka qoyska oo rukhsad leh.</p> <p>Adeegyada caafimaadka dhimirku waxay isugu jiraan.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qiimaynta Qaadashada, qiimaynta, iyo baadhitaanka • Caawimaada dadka isku faca ah • Daawaynta wax ka qabadka caafimaadka maskaxda sida <ul style="list-style-type: none"> ○ Shaljsi qoys, iyo kooxda daawaynta ○ Bukaani socod, hoy, iyo bukaan jiid ○ Qaababka daawaynta xoogan oo kooban • Dhibaatooyinka Adeegyada • Maamulka iyo la socodka daawada • Iskuduwidda daryeelka and bulshada integration
Dawooyinka Isticmaalka Obiyeedhka (MOUD)	<p>Hore loogu tixraacay sida Dawaynta Dawo ahaan La kaalmeeyo (MAT). Dawooyinka loo isticmaalo in lagu daaweeyo cudurada isticmaalka maandooriyaha. Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah.</p>
Wax ka qabadka Daawaynta Dhibaatooyinka Khamaarka	<p>Adeega la daboolo waxaa ku jira:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qiimaynta • Daawaynta shakhsiga, qoyska iyo/ama adeegyada kooxda

Washington Nidaamka Qoyska ee Dhalin yarada Gobolka Shuraakda Miisaska Wareegsan (FYSPRT) waxay bixisaa madasha qoyska, dhalin yarada, nidaamyada, iyo bulshooyinka si loo xoojiyo ilaha waara ee bixinta hababka bulshadda ku salaysan si wax looga qabto baahiyaha caafimaadka dhaqanka ee carruurta, dhalin yarada, iyo qoysaska.

Booqo HCA [boggayaga](https://hca.wa.gov/about-hca/programs-and-initiatives/behavioral-health-and-recovery/family-youth-system-partner-round-table-fysprt) macluumaadka dheeraadka ah: hca.wa.gov/about-hca/programs-and-initiatives/behavioral-health-and-recovery/family-youth-system-partner-round-table-fysprt.

Maaliyada Guud ee Gobolka (GFS) waa maaliyada gobolka ee Ururada Daryeelka La maareeyay (MCO) si loo caawiyo inay bixiyaan adeegyada aanu daboolin Apple Health. Tusaale ahaan, qolka iyo meesha hoyga caafimaadka dhaqanka (BH) daawaynta waxaa daboolaa Apple Health oo waxaa madhaba GFS.

Adeegyada ay maalgeliso GFS way ku kala duwan yihiin gobollada. Badanaa waxay kuxiranyihiin adeegyada kale ee habdhaqanka caafimaadka si loogu helo maaliyad dheeri ah.

Nafaqada

Adeega	Xog dheeraad ah
Daawaynta nafaqada caafimaadka	<p>Waxaa la daboolay macaamiisha da'doodu tahay labaatan (20) iyo ka yar markay caafimaad ahaan lagama maarmaan tahay oo uu soo gudbiyo adeeg bixiyahu ka dib baadhitaanka EPSDT.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxaa ku jira daawaynta nafaqada, qiimaynta nafaqada, iyo la talinta xaaladaha ku jira qaybta rugta ee khabiirka cuntada diiwaanka gashan (RD) si oo qiimeeyo oo loo daweeyo.
Nafaqada tuumbada afka laga qaato & meel kale oo aan afka ahayn laga qaato.	<p>Kaabayaasha nafaqada ee waalidka iyo alaabaha dhammaan dadka isqoray.</p> <p>Badeecada nafaqada mindhicirrada iyo alaabaha ee dhamman da' kasta ee dadka isqoray ee lagu quudiyo tubada. Alaabta nafaqa ka qaadashada afka ee macaamiishka 20 jirka ah iyo ka yar ee wakhtiga xadidan si wax looga qabto jirada daran.</p>

Baahiyaha daryeelka caafimaad ee gaarka ah ama xanuunka daba dheeraad.

Waxaad u qalmi kartaa adeegyada dheeraad ah iyada oo loo marayo barnaamijkeena Caafimaadka Guriga, ama isuduwidada daryeelka haddii aad qabto baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah ama jirada xiliga dheer. Kuwan waxaa ka mid ahaan kara helida tooska ah ee khabiirada. Xaaladaha qaarkood, waxaad awoodi kartaa inaad u adeegsato takhasuslahaaga sida PCP-gaaga. Na soo wac si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isku xirka iyo maaraynta daryeelka.

Daaweyn

Adeega	Xog dheeraad ah
<p>Baxnaaninta bukaan socodka (Daaweynta shaqo ahaaneed, Jirka, iyo Hadalka)</p>	<p>Tani waa dheef xadidan. Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah. Xaddidaaduhu waxay khuseeyaan haddii lagu fuliyay mid ka mid ah goobaha soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Rugta bunaak socodka • Isbitaalka bukaan socodka • Wakaaladda caafimaadka guriga ee ay aqoonsatahay Medicare <p>Markii la siiyo carruurta jirta da'da 20 iyo ka yar xarunta la aqoonsan yahay ee horumarinta neerfaha. Arag: doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/970-199-NDCList.pdf</p>
<p>Adeegyada Baxnaaninta</p>	<p>Adeegyada daryeelka caafimaadka ee kaa caawinaya inaad sii haysato, ogaato, ama aad anaajiso xirfadaha iyo u shaqeynta nolol maalmeedka aan lagu helin sababo la xiriira dhalasho, hidde, ama xaaladaha caafimaad ee hore. Tani waa dheef xadidan. Naga soo wac lambarkan Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah.</p> <p>Xaddidaaduhu waxay khuseeyaan haddii lagu fuliyay mid ka mid ah goobaha soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Rugta bunaak socodka • Isbitaalka bukaan socodka • Guriga wakaalada faleedaba guriga ee Medicare ahaan la ansixiyay <p>Markii la siiyo carruurta jirta da'da 20 iyo ka yar xarunta la aqoonsan yahay ee horumarinta neerfaha. Arag: doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/970-199-NDCList.pdf</p>

Takhasus

Adeega	Xog dheeraad ah
Kahortga xasaasiyadda (Dareere Xasaasiyadda)	Tallaalada xasaasiyadda.
Qalliinka Buurnida	Oggolaansho hor udhac ayaa looga baahan yahay qalliinka Buurnida. Kaliya waxaa laga heli karaa Xarumaha Heerka Sare ee HCA-ogolaatay (COE).
Habka Daaweynta dib ushaqaynta jirka	Ku kooban dalabaadka qorshaha
Dawaynta kimikalka	Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan ogolaansho hore.
Qalliinka jir Qurxinta	Kaliya marka qalliinka iyo adeegyada la xiriira iyo sahayda la bixiyo si loo saxo cilladaha jir ahaaneed ee dhalashada, jirrada, dhaawacyada jirka, ama dib-u-dhiska naaska ee daaweynta kansarka ka dib.
Qalabka xanuunka Sokorta (Macaanka).	Qalab kooban oo la heli karo iyada oo aan hore loo oggolaan. Qalabaat dheeri ah ayaa lagu heli karaa oggolaansho hore
Sifaynta kelyaha	Adeegyadan waxay u baahan karaan oggolaansho hore
Daawaynta Cagaarshowga C	<p>Adeeg bixiye kasta oo ruqsad haysta si loo qoro dawooyinka tooska wax uga qabanaya fayraska ku lidka ah waxaa loo baahan yahay in la baadho oo la dawooyo xubnaha Apple Health. Kuwan waxaa ku jira adeeg bixiyaasha daryeelka koowaaad, jirada isticmaalka xarumaha walxaha macmnuuca ah, iyo kuwa kale.</p> <p>Dawooyinka daawaynta Cagaarshowga C qaarkood ayaa daboolaa Adeegyada Apple Health waa La ceymiyay iyadoon la helin qorshe daryeel ee la maareeyay Naga soo wac lambarkan 1-800-440-1561 (TTY: 711) si aad wax badan ka barato.</p>
Beerista Xubnaha	Qaar ka mid ah xubin ku beeriada waxaa daboosha Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo. Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah.

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeeyada Oksijiinka iyo Neef mareenka	Ogsajiinta caafimaad ahaan lama huraanka ah iyo/ama qalabka daawaynta neefsashada, saadka, iyo adeegyada kuwa diiwaanka gashan ee u qalma.
Daaweynta lugaha	Tani waa dheef xadidan. Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah.
Sigaar Joojinta	Waxaa loo daboolay dhammaan macaamiisha haysta soo gudbinta PCP ama ogolaansho hore. Wac Community Health Plan of Washington ee 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii macluumaad dheeraad ah ama booqo boggooda internetka oo ah chpw.org/quit-for-life/ .
Adeegyada Caafimaadka Dadka sinjiga Beddela	Adeegyada la xidhiidha caafimaadka qofka sinjigiisa beddela iyo daawaynta cuduraka ka yimaada walbahaarka beddelka sinjiga waxaa ka mid ah daawaynta beddelka hormoonada, daawaynta cadaadinta qaan gaahida, iyo adeegyada caafimaadka maskaxda. Adeegyadan waxay u baahan karaan oggolaansho hore.
Baaritaanka Qaaxada (TB) iyo La-Socodka Daaweynta daawaynta la socodka ah	Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad u tagto PCP gaaga ama waaxda caafimaadka deegaankaaga.

Maqalka iyo Aragtida

Adeega	Xog dheeraad ah
Tijaabooyinka Maqalka	Baadhitaanka maqalka
Qalabyadaa lagu Rakibo lafta dhagta ee Caawiya Maqlka (BAHA)	<p>Ku beerida Qalabka gudaha Dhegta ee labbada waxaa ku jira, qalab gelinta, qaybaha, qalabyada, baytariyada, jaarjarada, iyo sib u samaynta waa dheefta la daboolo dadka oo dhan.</p> <p>BAHA, ay ku jirto qalabyada BAHA (labbadaba qaliin ahaan la geliyo iyo sameecadaha jilicsan ee madaxa lagu xidho), beddelka qaybaha, iyo baytariyada waa dheefta carruurta 20 sano jirka iyo ka yar.</p>
Baadhitaanka indhaha & ookiyaalaha	<p>Waa inaad isticmaashaa shabakadeena adeeg bixiyaha. Naga soo wac si aad u hesho macluumaad kusaabsan dheeta.</p> <p>Carruurta 20 sanadood jirka ah iyo ka yar, muraayadaha indhaha iyo qalabka lagu beddelo waa la daboolaa. Waxaad ka heli kartaa qaybiyayaasha muraayada bogga: fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/.</p> <p>Dadka waa wayn ee u baahan muraayadaha indhaha kharashka la yareeyay waxaad ka iibsanaa kartaa fareemada muraayadaha iyo muraayada wiilka lagu dhegjiyo dhexda adeeg bixiyayaasha ka qayb agalaya ee indhaha. Hel liiska adeeg bixiyayaasha ka qayb galaya: hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf.</p> <p>Sidii qayb ka mid ah Dheeftayada Qiimaha Lagu daro, dhammaan xubnaha jira 21 iyo ka wayn waxay heli karaan muraayadaha indhaha bilaashka ah dhexda VSP.</p> <p>Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan dheeftan, arag websaydkayaga: chpw.org/vision.</p>

Adeega	Xog dheeraad ah
Tijaabada Maqalka iyo Qalabka Gargaarka Maqalka	<p>Baadhitaanada waa dheefaha la daboolo ee dhammaan shakhsiyaadka</p> <p>Qalabka kaalmada maqalka waa loo heli karaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Carruurta 20 ama ka yar • Dadka waa wayn ee buuxiya heerka qiimaynta <p>Kaalmada maqalka hal dheg ah waxaa ku jira:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Leekaysiinta • La socodka • Baytariyada

Qorshaynta Qoyska / Caafimaadka Taranka

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeega Qorshaynta Qoyska ay ku jiraan dawo qorida iyo kiniinka xakamaynta la iibsado, kiniinka ka hortagga uurka, iyo ka hortagga uurka degdega ah (Qorshaha B)	Waxaad adeegsan kartaa shabakadeena adeeg bixiyaasha, ama waxaad aadi kartaa waaxdaada caafimaadka ama rugta qorshaynta qoyska.
Baaritaanka HIV / AIDS	Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad u tagto rugta qorshaynta qoyska, waaxda caafimaadka deegaanka, ama PCP-gaaga si loo baaro.
Daboolida Uurka Ka dib (APC)	Haddii aad ka diiwaan gashan tahay daboolida Apple Health oo aad uur leedahay, waxaad heli kartaa ilaa 12 bilood oo daboolida dhalmada ka dib marka uurkaagu dhammaado. Wax badan ka baro www.hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/i-need-medical-dental-or-vision-care/after-pregnancy-coverage .

Qalabka caafimaadka iyo saadadka

Waxaan daboolnaa qalabka caafimaadka ama sahayda markii ay caafimaad ahaan lagama maarmaan yihiin oo uu noo qoro bixiyahaaga daryeelka caafimaad. Waa inaan horey u ansixino inta badan qalabka iyo agabyada intaan bixin qarashkooda. Naga soo wac si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qalabka caafimaadka iyo sahayda.

Adeega	Xog dheeraad ah
Qalab Caafimaadka	Qalabka badankood waa inay helaan oggolaansho hore. Naga soo wac lambarkan Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah.
Agab Caafimaadka	Agabka badankood waa inay helaan oggolaansho hore. Naga soo wac lambarkan Naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711) wixii faahfaahin gaar ah.

Shaybaarka iyo raajada

Adeega	Xog dheeraad ah
Raajo iyo Adeegyada Sawirka Caafimaadka	Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan oggolaansho hore.
Adeegyada Shaybaarka iyo raajada	<p>Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan oggolaansho hore.</p> <p>Xadidnaanta hoos lagu muujiyay waxaa loogu talo galay adeegyada cudur baadhita bukaan socodka oo keliya:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Shaashadaha dawada marka caafimaad ahaan ay lama huraan tahay iyo: <ul style="list-style-type: none"> • Uu dalbaday dhakhtarku sidii qayb qiimaynta caafimaadka. • Shaashada isticmaalka maandooriyaha loo baahan yahay si loo qiimeeyo ku habbhoonaanta baadhitaanada caafimaadka iyo daawaynta. <p>Adeegyada raajada la qaadi karo ee la dhigay gudaha guriga qofka is diiwaan gelinaya ama xarunta kalkaaliska waxay ku xadidan yihiin filimada aay ku lug lahayn isticmaalka waxyaabaha jidhka raajada loo mariyo.</p>

Caafimaadka Haweenka iyo Hooyada

Adeega	Xog dheeraad ah
Qalabka lagu liso Naasaha	Noocyada qaarkood waxay u baahan karaan oggolaansho hore.
Adeegyada Dhalmada ee Haweenka	<ul style="list-style-type: none"> • Daryeelak dhalmada ka hor: booqashooyinka caadiga ah ee xafiiska la xidhiidha adeegyada ka yimid adeeg bixiyaha doorashadaada ah. • Ku umulida cusbitaalka, xarunta ka dhalinta, ama dhalashada guriga. La hadal adeeg bixiyahaaga dhalmada si uu u go'aamiyo doorashada kuugu habboon adiga. • Umulinta ay bixiso ummulisada ruqsada haysata, kalkaalisa ummulisada ah ama dhakhtar. • 12 bilood daryeelka dhalmada ka dib ee dhammayska tiran ee daryeelka dhalmada. • Hal sano daryeelka caafimaadka dhallaanka. • Quudinta xabadka -La talinta naasnuujinta.
Daryeelka Caafimaadka Haweenka	Adeegyada daryeelka caafimaadka caadiga ah iyo kahortaga, sida daryeelka hooyada iyo daryeelka dhalmada ka hor, raajada naasaha, caafimaadka taranka, baaritaanka guud, adeegyada kahortaga uurka, baaritaanka iyo daaweynta cudurada galmada lagu kala qaado, iyo naas nuujinta.

Adeegyada dheeraadka ah ee aan bixinno

Xaga CHPW, daboolida Apple Health wadiga ayay kugu dhisan tahay Waxaan ubixinaa adeegyada dheeraadka iyo dheefaha aan kharashk kugu taagnayn oo waxaanu kaa caawinaa adiga iyo qoyskaaga inaad ku noolaato nolol ka caafimaad badan.

Daryeelka Onlaynka ah iyo Laynka Talada Kalkaaliska Ku nooqo dhakhtarka telefoon ama fiidyow wakhti kasta, maalin habeen. Wixii macluumaad dheera ah, booqo chpw.org/virtualcare. Ama soo wac Laylka Kalkaaliska 24-saac 1-866-418-2920 (TTY: 711) si aad ula hadasho kalkaaliso diiwaan gashan.

First Steps (daryeelka hooyada iyo dhallaanka). Barnaamijkan waxaa lagu bixiyaa dhexda Masuuliyada Daryeelka Washington State Health. Waxay dabooshaa adeegyo kala duwan haweenka uurka leh ee dakhliga hoose leh iyo carruurtooda. Wixii macluumaad dheera ah, booqo www.hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/i-need-medical-dental-or-vision-care/first-steps-maternity-and-infant-care.

Taleefan Bilaash ah. Waxaad u qalmi kartaa taleefan gacmeed bilaash ah iyo daqiiqado wicitaan bilaash ah iyo fariimo qoraal ah. Wixii macluumaad dheera ah, booqo chpw.org/free-cellphone/.

90-maalmood buuxinta dawo qorida ah. Haddii aad qaadanayso daawooyinka qaarkood ee muddada-dheer ee xaaladaha daba-dheeraada (caafimaadka maskaxda, sonkorowga, dhiig-karka, cudurka halbowlayaasha wadnaha, ama wadnaha oo xumaada) waxay heli karaan daawo qorid 90 maalmood ah.

Taageerada caafimaadka dhaqanka. Dad badan, dadka waaweyn iyo carruurta si isku mid ah, waxay la kulmaan caafimaadka dhimirka ah ama xaaladaha isticmaalka maandooriyaha wakhti ka mid ah noloshooda. Websaydkayaha waxa uu hayaa macluumaadka dhammaan da'aha ee aqoonshada iyo maaraynta caafimaadka maskaxda ama xaalada isticmaalka maandooriyaha. Macluumaadka dheeraadka ah xagan chpw.org/behavioral-health.

Lacag dhimista Amazon Prime. Xubnaha u qalma Apple Health waxay heli karaan lacag dhimis ka badan 50% xubinimada Prime. Enjoy labbaa maalmood oo diritaan ah malaayiin shay oo lagu daray filimaan bilaash ah, muusig, iyo buugta internetka laga akhristo. Wax badan xaga chpw.org/amazon-prime/.

Dheefaha Qiimaha Lagu daro (VAB)

Dheefta qiimaha lagu daro VABs waxaa bixiya Community Health Plan of Washington oo waxaa lagud araa dheefahaaga Apple Health. Kuwan waxay ku siin karaa doorashooyin badan ee daryeelka iyo asbaabaha cinwaanka bulshadda ee caafimaadka. VABs khasab maaha oo wax kharash ah adiga kuguma joogto.

Muraayadaha indhaha oo bilaash ah ee dadka waa wayn. CHPW waxay siisaa muraayadaha indhaha bilaashka ah (fareemada iyo muraayada wiilka lagu dhejiyo oo caadi ah) xubnaha da'da 21 iyo ka wayn. Waxaanu sidoo kale daboolnaa baadhitaanada indhaha caadiga ah 24 biloodh. (Muraayadaha indhaha ee carruurta ka yar 21 waxaa ku daboolo Apple Health dhexda Health Care Authority). Arag chpw.org/vision wixii faahfaahin ah.

Daawaynta Beddelka ah Xubnaha CHPW waxay heli karaan wadarta la isku daray ilaa 20 akubanjari, duugitaan, iyo booqashooyinka daawaynta sanadkiiba, Ma jiraan gudbin ama oggolaanshe hore oo loo baahan yahay. Faahfaahin badan bogga chpw.org/alternative-treatments/.

ChildrenFirst™. Waxay ku siisaa adiga iyo carruurtaada sidii bilowga caafimaad fiican. Barnaamijkaayaga ChildrenFirst™ waxa uu abaal mariyaa xubnaha uuraka leh iyo carruurta kaadhadhka hadiyadaha dhalimada ka hor, dhalimada ka dib, iyo baadhitaanka ilmaha fayao qaba. Macluumaadka dheeraadka ah xaga chpw.org/childrenfirst.

Xubinimada Boys & Girls Club. Xubinta CHPW, ilmahaaga (da'aha 6 ilaa 18) waxay helaan gaadhida bilaashka ah ee dugsiya ka dib si ay uga qayb galaan naadiyada. Xiiseeyaan caawimada la'yiska guriga, hawlaha jidh dhisnaanta, cuntooyin fudud oo bilaash ah, iyo qaar kaloo badan. Arag chpw.org/boys-and-girls-club/.

Ciyaaraha jidhka ee Carruurta. Carruurtaada (da'aha 6-18) waxay ka heli karaan dhakhtarkooda baadhitaanka jimicsiga jidhka sanad kasta oo lacag la'aan. Tani waa marka lagu daro baadhitaanka ilmahaaga sanadlaha ah. Faahfaahinta bogga chpw.org/sportsphysical.

Gudniin. CHPW waxay dabooshaa ilaa \$200 dhanka gudniinka ilmaha. Ilma kasta oo ka yar 18 labka loo magacaabay xaga dhalashada ayaa u qalma. Faahfaahinta bogga chpw.org/circumcision.

Iskuduwidda Daryeelka

Adeegyada Maareynta Kiisaska Adag.

Maareynta kiisaska isku dhafan waa adeeg ka caawiya xubnaha leh baahiyo caafimaad oo isku dhafan ama baahiyo daryeel caafimaad ee badan si ay u helaan daryeel iyo adeegyo. Maareeyayaasha kiiska waxay gacan ka geystaan isku dubaridka daryeelkaaga, iyadoo ujeedadaada maskaxda lagu hayo. Wakiilka Qorshaha wuxuu kuu soo jeedin karaa maaraynta kiiska oo ku saleysan su'aalaha looga jawaabayoo baaritaankaaga caafimaad ee ugu horeeya (qiimeynta caafimaadka) marka la qoro

Waad weydiisan kartaa adigu adeegyada maareynta kiiska naf ahaantaada ama xubin qoyskaaga ah markasta. Adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka, qorsheeyayaasha soo bixidda, daryeel bixiyayaasha iyo barnaamijyada maaraynta caafimaadka ayaa waliba kuu gudbin karaa maaraynta kiiska. Waa inaad ogolaata adeegyada maareeynta kiiska. Wixii su'aal ah wac lambarkan 1-800-440-1561 (TTY 711).

Adeegyada Isuduwidda Daryeelka Dheeraadka ah ee Aan Bixin Karno

Si aad u daryeesho caafimaadkaaga, waa inaad marka hore daryeesho baahiyahaaga aasaasiga ah. Community Health Plan of Washington kooxda Barnaamijyada Bulshadda ayaa kugu xiraya ilaha deegaanka ee baahiyahan qaarkood. Waan garan karnaa ilaha caawimaadda, waxaan sameyn karnaa gudbin, waxaanna isku xiri karnaa bixiyeyaashaada. Adeegyada Taageerada bulshada ayaa kugu xiri kara ilaha iyo barnaamijyada bulshadaada, sida: guriyeynta, gaadiidka iyo cuntada. Waad weydiisan kartaa adigu Barnaamijyada adeegyada Bulshada ama xubin qoyskaaga ka mid ah ayaa adiga ku weydiin karta. Kuwa kale, sida bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka, qorsheeyayaasha kabixitaanka isbitaalka, daryeel bixiyeyaasha iyo howlwadeenadeena maaraynta kiisaska, waxay sidoo kale kuu gudbin karaan Barnaamijyada Bulshada si aad u gaarto adeegyada. Waxaan ubaahanahay ogolaanshahaaga kahor intaadan helin adeegyada Barnaamijyada Bulshada. Wixii macluumaad dheeraad ah wac 1-866-418-7006.

Waxaan sidoo kale kaa caawin karnaa inaan kugu xirno daaweyn ama adeegyo aad u baahan karto sida: Kalkaalinta Waajibaadka Shaqada Gaarka ah, ABA (Taxliilinta Habdhaqanka La adeegsado), WISE (Adeegyada Uruursan ee Isku hareeraysan), PACT (Barnaamijka Adkaysiga ee Barnaamijka Bulshada) iyo CLIP (Daaweynta Caruurta Bukaana-jiiifka ah ee Muddada Dheer). Mid kastoo ka mid ah shaqaalaheena ayaa kaa caawin kara inuu kugu hago adeegyadaas. Wixii ah su'aalaha gudbinta, soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711).

Taageerooyinka Bulshada. Taageerooyinka Bulshada waxay helaan daryeelka caafimaadka dhaafsiisan. Waxay kaa caawineysaa dhinacyada kale ee nolashaada taa oo saameysa caafimaadkaaga. Adeegyada Taageerada bulshada ayaa kaa caawin kara inaad hesho guri deggan, kaa oo kaa caawiya inaad gaarto haqab beelka cuntada, hubiya in aad haysato gaadiid aad u raaceyso ama aad uga soo laabaneysa ballamahaaga caafimaad, waxayna kugu xiri doontaa ilaha kale ee deegaanka.

Maaraynta Kiiska Maareynta arrimo caafimaad oo badan ama arrimo caafimaad oo daba-dheeraaday way adkaan kartaa. Kooxdayada Maareynta Kiiska ayaa halkan u jooga in ay ku caawiyaan. Maamulaha kiiskaaga shaqsiyeed ayaa kaa caawin doona in aad aqoonsato oo aad sameyso qorshe aad ku gaarto yoolalkaaga caafimaad. Waxay sidoo kale halkaas u joogi doonaan inay isku duba ridaan adeegyada caafimaadka iyo barnaamijyada kala duwan ee aad u baahan tahay inaad sida ugu fiican u dareento.

Kala Guurka Daryeelka. Ka dib markaad ka soo baxdid cisbitaalka, waxaad weli u baahan tahay caawimaad si aad u hubiso inaad si buuxda u bogsatay. Kooxda Ku Meelgaarka ah ee Daryeelka ee CHPW waxay kala shaqeeynayaan isbitaalkaaga si loo hubiyo in kabixitaankaagu siihayntu ay sahal tahay Waxay kugu soo hubin doonaan wicitaan taleefan kadib markaad isbitaalka ka baxdo. Waxay hubin doonaan inaad awoodid inaad tagto ballamahaaga dabagalka ah iyo inaad soo qaadata daawada aad u baahan tahay.

Waa iskaga tegi kartaa. Waan caawin karnaa. Jooji sigaar cabista adigoo la kaashanayo caawimada tababarka, taageerada shabakada, iyto ilaha kale ee barnaamijka Quit for Life®. Wax badan ka baro xaga chpw.org/quit-for-life/.

Health Homes. Baro sida barnaamijka Health Homes u fududeyn karo maaraynta daryeelkaaga. Xubnaha uqalma waxay heli karaan caawimaad kusaabsan daryeelka ku meelgaarka ah, iskuduwidda daryeelka, waxbarashada caafimaadka, maaraynta daryeelka, iyo waxyaabo kaloo badan. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa chpw.org/health-homes.

Maamul caafimaadkaaga Dhimirka. Barnaamijka Isdhaxgalka Caafimaadka Dhimirka wuxuu ku siinayaa inaad si fudud u hesho bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka ee rugtaada daryeelka aasaasiga ah, iyada oo aan lagaa qaadin lacag dheeraad ah. Isku-duwayaasha daryeelka waxay la tashan karaan takhasusleyaasha waxayna kuu sameyn karaan tixraacyo xagga caafimaadka maskaxda ah, haddii loo baahdo. La hadal Community Health Plan of Washington wakiilka lambarka 1-800-440-1561 (TTY: 711) si aad wax badan ka barato.

Taageerada uurka. Taageerada mid ilaa mid ah muddada iyo ka dib uurka. Faa'iidooyinka sidoo kale waxaa ku jira bamka naaska ee bilaashka ah iyo helida goobaha maxaliga ah. Wax badan bogga chpw.org/chpw-benefits-plus/healthy-you-healthy-baby

Caawimaadda Adeegyada Habdhaqanka Caafimaadka ee Dhalinyarada. CHPW waxay leedahay adeegyo ku saleysan guri, iskuul iyo bulshada si looga caawiyo carruurta baahiyaha habdhaqanka. Marka dabeecadda ilmuhu carqaladeyso nolosha qoyska, dugsigu ama asxaabta, waxay ka faa'iideysan karaan caawimaadda habdhaqanka caafimaadka. Caawimaadda waxaa ka mid ah: iskuxirka daryeelka uruursan iyo adeegyada caafimaadka ee dhimirka ah ee uruursan oo lagu bixiyo guriga. Haddii uu ilmahaagu u baahan yahay Baadhitaanka dhaqanka la dabaqo (ABA), fadlan soo wac laynkayaga u diyaarka ah laymanka telefoonka ABA - Lambarada telefoonka ABA: 1-866-418-7004 ama 1-866-418-7005 (D-SNP). Waxaa sidoo kale lagala soo xidhiidhi karaa: caremgmtReferrals@chpw.org

Adeegyada Apple Health waa La ceymiyay iyadoon la helin qorshe daryeel ee la maareeyay

Apple Health waxay dabooshaa qayb adeegyada kale ah oo aan lagu daboolin hoosta qorshaha daryeelka la maareeyo (sidoo kale loo yaqaano sida kharashka adeega). Barnaamijyada kale ee bulshadda ku salaysan waxay daboolaan dheefaha soo socda iyo adeegyada ku qoran hoos xataa marka aad ka diiwaan gashan tahay anaga. Waxaanu isku xidhi doonaa PCP si lagaaga caawiyo helida adeegyadan iyo isku xidhka daryeelkaaga. Waxaad u baahan doontaa inaad u isticmaasho kaadhkaaga adeegyada ProviderOne dhammaan adeegyada.

Na soo wac wixii ah su'aalaha waxtarka ama adeegga aan halkan ku taxnayn. Arag daboolida Apple Health oo aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo buug yaraha wixii ah liiska dhammayska tiran ee adeegyada: hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/19-065.pdf.

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeegyada ilka soo ridka	<p>Adeegyada kharashka ah ee Apple Health waxay daboolaan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dawada ilma soo ridka, sidoo kale loo yaqaano kiniinka ilma soo ridka. • Qaliinka ilma soo ridka, sidoo kale loogu yeedho ilma soo ridka gudaha rugta. <p>Macaamiishaka ka diiwaan gashan ururka daryeelka la maareeyo ee Apple Health (MCO) waxay nafahooda u tixraacaan dibada MCO wixii ah adeegyada MCO.</p> <p>Waxaa ku jira la socodka daryeelka ee cudur ka sii dar ah oo kasta.</p>
Adeegyada Ambalaaska (Cirka)	<p>Dhammaan adeegyada gaadiidka ambalaaska waxaa la siiyaa macaamiisha Apple Health, oo ay ku jiraan kuwa ku qoran urur daryeel la maareeyey (MCO).</p>
Adeegyada Ambalaaska (Dhulka)	<p>Dhammaan adeegyada gaadiidka ambalaaska dhulka, xaaladaha degdegga ah iyo kuwa aan degdegga ahayn, waxaa la siiyaa macaamiisha Apple Health, oo ay ku jiraan kuwa ku qoran urur daryeel la maareeyey (MCO).</p>
Dhibaatooyinka Adeegyada	<p>Adeegyada dhibaatooyinka ayaa la heli karaa si ay kuu caawiyaan, iyadoo lagu saleynayo halka aad ku nooshahay. Soo wac 911 gurmada nolosha khatar gelayso ama 988 wixii ah gurmada caafimaadka maskaxda. Ka eeg bogga 21 lambarrada aaggaaga.</p> <p>Ka qaranka ee Suicide Prevention Lifeline: Wac or text 988 or wac: 1-800-273-8255, TTY Isticmaalayaasha 1-206-461-3219</p> <p>Caafimaadka dhimirka ama dhibaatooyinka khalkhalka isticmaalka mukhaadaraadka, fadlan wac hay'adaha Adeegyada Maamulka Hbdhaqanka Caafimaadka (BH-ASO). BH-ASO waxay taageeraan adeegyada dhinta ee dadka degen Washington iyaddoon loo eegin u qalmida Apple Health. Nambarada taleefannada waxaa laga heli karaa bogga 20 ee kore, ama: hca.wa.gov/mental-health-crisis-lines.</p>

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeegyada Ilkaha	<p>Adeegyada la qandaraaska waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dawo qorida uu qoro dhakhtarka ilkahu. • Adeegyada ABCD ay bixiyaan adeeg bixiyaha la ansixiyay ee ABCD. • Adeega caafimaadka/qaliinka uu bixiyo dhakhtarka ilkahu. • Qaliinka Cusbitaalka/Goobta Wareegta Goobta Xarunta kharashka ku dalacda. <p>Dhammaan adeegyada ilkaha waxaa daboolaa Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo.</p> <p>Waa inaad aragtaa adeeg bixiyaha ilkaha kaas aqbalay inuu biilka u diro Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo iyadoo la isticmaalayo kaadhka adeegyada ProviderOne.</p> <p>Wax badan ka ogow:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Onlayn ah bogga hca.wa.gov/dental-services, ama • Wac Ee HCA 1-800-562-3022. <p>Si aad u hesho daryeel bixiye aqbala Washington Apple Health online-ka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • DentistLink.org • fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/

Adeega	Xog dheeraad ah
<p>Muraayadaha indhaha iyo Adeegyada ku habboon</p>	<p>Carruurta 20 sano jirka iyo dhaliyarada - fareemada muraayadaha indhaha, baliisha, Baliisha indha lagu dhagsado, iyo adeegyada ku habboon waxaa daboolaya caymiska Apple Health iyada oo aan la helin qorshe daryeel ee la maareeyey.</p> <p>Dadka waaweyn 21 iyo wixii ka weyn – faree, ada muraayadaha indhaha iyo baliisha indhaha ma daboolaan Apple Health, laakiin haddii aad rabto inaad iibsato, waad ku dalban kartaa iyaga oo u maraya bixiyeyaasha indhaha ee kaqeyb gala qiimaha la dhimay. Booqo: hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf</p>
<p>Adeegyada Taakulaynta Hooyada ee First Steps (MSS) iyo Maareynta Kiiska Dhallaanka (ICM), iyo Waxbarashadda Dhalashada ilmaha (CBE)</p>	<p>MSS waxay u fidisaa macaamiisha uurka leh iyo umusha adeegyada caafimaadka ee kahortagga iyo adeegyada waxbarashada ee guriga ama xafiiska si looga caawiyo uur caafimaad qaba iyo ilmo caafimaad qaba.</p> <p>ICM waxay ka caawisaa qoysaska leh carruurta ilaa hal sano ah inay wax ka ogaadaan, sida loo isticmaalo, baahiyaha caafimaad, ee bulsho, waxbarasho, iyo ilaha kale ee bulshada si ilmaha iyo qoysku u kobcaan.</p> <p>CBE waxa uu siiyaa shakhsiyaadka uurka leh iyo qofka(dadka) kale ee taageeradood aah fasalada kooxdaha halka ay dhigaa adeegy bixiyaha HCA CBE. Mowduucyada waxaa ka mid ah calaamadaha uurka, nafaqada, naas nuujinta, qorshaha ilma dhalida, waxa laga filayo muddada foosha iyo ummulida, iyo badbaadada ilmaha dhashada.</p> <p>Adeeg bixiyayaasha aaga, booqo hca.wa.gov/health-care-services-supports/apple-health-medicaid-coverage/first-steps-maternity-and-infant-care.</p>
<p>Daryeelka Bukaankii jifka Dhimirka ee Carruurta (Barnaamijka Bukaankii jifka Xiliga dheer ee Carruurta [CLIP] ee da'aha 5 ilaa 17 sano jirka)</p>	<p>Waa in ay bixiyaan hay'adaha la aqoonsayhay ee Waaxda Caafimaadka (DOH). Nala soo wac si aan kaaga caawino helitaanka adeegyadan.</p>

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeegyada Daryeelka Muddada-dheer iyo Caawimaadda (LTSS)	Eeg bogga 46 ee buug-yarahaan.
Ka xidhida dhalmarta, da'da 20 iyo wixii ka yar	Waa inuu buuxiyo foomka madhalays ka dhigidda 30 maalmood kahor ama buuxiyo shuruudaha ka dhaafidda. Dib u soo celinta aan la daboolin.
Adeegyada Caafimaadka Dadka sinjiga Beddela	Adeegyada waxaa ku jira nidaamyada qaliinka, waxteelda timaada qaliinka ka dib, iyo baabiinta jirada timaha ama ku jirada laysar timaha si loogu diyaariyo qaliinka xubinta taranka. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay. Oggolaanshaha hore soo wac 1-800-562-3022 ama iimayl u dir transhealth@hca.wa.gov . Wax badan ka baro hca.wa.gov/transhealth .
Maadada Isticmaalka Dadka Uurka leh (SUPP) Barnaamijka	Barnaamijka SUPP waa barnaamijka cusbitaalka ah oo bulaan jiiifka ah ee shakhsiyaadka uurka leh ee qaba baahida caafimaadka iyo taariikhda isticmaalka maandooriyaha. Ujeedada barnaamijku waa in la yareeyo waxyeelada waalidka dhalaya iyo carruurtooda aan weli dhalan iyaddoo lagu siinayo maaraynta dib u gurista iyo degenaanshaha caafimaadka iyo daawaynta gudaha goobta cusbitaalka. Macluumaadka dheeraadka iyo liiska adeeg bixiyayaasha la ansixiya, booqo www.hca.wa.gov/supp-program
Gaadiidka loogu talagalay ballamaha caafimaadka aan degdegga ahayn	Apple Health waxay bixisaa adeegyada howlaha gaadiidka ee tegiida iyo imaanshaha ee ballamaha loobaahanyahay ee dareyeelka caafimaad ee aan deg-degga ahayn. Wac bixiyaha gaadiidka (dillaal-ka) aaggaaga si aad wax uga ogaato adeegyada iyo xaddidaadaha. Dilaalkaaga gobolkaaga ayaa kuu diyaarina doona gaadiidka kuugu habboon, uguna kharash yar. Liiska dulaaliinta waxaa laga heli karaa hca.wa.gov/transportation-help .

Adeegyada muddada-dheer iyo kaalmooyinka (LTSS)

Maamulka Gabowga iyo Caawimaadda Muddada Dheer (ALTSA) - Adeegyada Guriga iyo Bulshada (HCS) waxay siisaa dadka waaweyn adeegyo daryeel muddo-dheer iyo shakhsiyaadka naafada ah ee guryahooda ku nool, oo ay ku jiraan daryeel-bixiye guri-dhexdiisa ah, ama goobaha la deggan yahay ee bulshada. HCS waxay kaloo bixisaa adeegyo ka caawiya dadka ka gudbida guryaha xanaanada iyo caawinta daryeelayaasha qoyska. Adeegyadan ma bixiyaan qorshahaaga caafimaad. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada daryeelka muddada-dheer, wac xafiiskaaga HCS ee deegaankaaga.

LTSS Adeegyada Guriga iyo Bulshada ee ALTSA waa inay ansixiyaan adeegyadan. Wac xafiiskaaga HCS ee deegaankaaga wixii macluumaad dheeraad ah:

GOBOL 1 – Adams, Asotin, Benton, Chelan, Columbia, Douglas, Ferry, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Walla Walla, Whitman, Yakima –
1-509-568-3767 ama 1-866-323-9409

GOBOL 2N – Island, San Juan, Skagit, Snohomish, iyo Whatcom –
1-800-780-7094; Nursing Facility Intake

GOBOLKA 2S – King – 1-206-341-7750

GOBOL 3 – Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Kitsap, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Thurston, Skamania, Wahkiakum –
1-800-786-3799

Maamulka Naafada Korriimada (DDA) waxay ujeedadeedu tahay inay ka caawiso carruurta iyo dadka waaweyn ee naafonimada korriinka leh iyo qoysaskooda inay helaan adeegyo iyo caadimaado ku saleysan baahida iyo xulashada bulshada ay rabaan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada iyo taageerooyinka, fadlan booqo dshs.wa.gov/dda/ ama wac xafiiska DDA ee deegaankaaga hoos ku taxan.

Adeegyada Maamulka Naafada Korriimada (DDA) waa inuu ogolaadaa adeegyadan.

Dadka Haddii aad u baahan tahay macluumaad ama adeegyo fadlan la xiriir

Naafada xafiiskaaga maxalliga ah ee DDA:

Korriimada ah

Gobolka 1: Asotin, Chelan, Douglas, Ferry, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Whitman – 1-800-319-7116 ama iimayl

R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov

Gobolka 1: Adams, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Yakima -
1-866-715-3646 or ama iimayl R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov

Gobolka 2N: Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom -
1-800-567-5582 ama iimayl R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov

Gobolka 2S: King – 1-800-974-4428 ama iimayl
R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov

Gobolka 3: Kitsap, Pierce – 1-800-735-6740 ama iimayl
R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov

Gobolka 3: Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston,
1-888-707-1202 ama iimayl R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov

Barnaamijyada Waxbarashada Hore

Waxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) waxay siisaa adeegyo iyo barnaamijyo carruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano.

Barnaamijka Carruurnimada Hore iyo Barnamijka Caawinta (ECEAP) iyo Head Start

waa barnaamijyada xanaanada kahor ee Washington oo u diyaariya 3 ilaa iyo 4 sano jir ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo si u guulaystan iskuulka iyo nolosha. ECEAP waxay u furantahay ilmo kasta iyo qoys kasta oo dugsiga xannaanadda ka hor ah haddii ay buuxiyaan xadka dakhliga. Wixii macaluumaad ah ee ECEAP iyo HeadStart ee booqashooyinka kahor iskuulka dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/eceap-headstart.

Adeegyada Taakulaynta Hore ee Dhallaanka iyo Caruurta yaryar (ESIT) waxaa loogu talagalay inay awood u siiso carruurta dhalashada illaa saddex ee leh dib-u-dhaca korriinka ama naafanimada inay noqdaan kuwo firfircoon oo guuleysta inta lagu jiro sannadaha hore ee carruurnimada iyo mustaqbalka meelo kala duwan, Goobaha waxaa ka mid ah guryahooda, daryeelka ilmaha, dugsiga barbaarinta ama barnaamijyada dugsiga, gudaha bulshaddooda. Macluumaadka dheeraaka ah booqo dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/esit.

Booqashada Guriga ee Qoysasku waa ikhtiyaari, oo diiradda saaraya qoyska waxaana loo fidiyaa waalidiinta mustaqbalka iyo qoysaska leh dhallaanka cusub iyo carruurta yar si ay u taageeraan caafimaadka jir ahaaneed, bulsho, iyo dareenka caafimaad ee ilmahaaga. Macluumaad dheera ah booqo dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/home-visiting

Adeegyada Fargelinata Caruurnimada Hore iyo Adeegyada Kahortaga (ECLIPSE) waxay u adeegtaa caruurta dhalata ilaa 5 sano jir ee halista ugu jira xadgudubka caruurta iyo dayacaad waxaana laga yaabaa inay la kulmaan arrimo caafimaad dabeecadeed sababo la xiriira in loo gaysto dhaawac culus. Adeegyada waxaa lagu bixiyaa Degmada King iyo Degmada Yakima. Macluumaad dheera ah booqo dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/eceap.

Nala soo xiriir annaguna waxaan kaa caawin karnaa inaan kugu xirno adeegyadan.

Adeegyada Laga Reebay (ee Aan la daboolin)

Adeegyada soo socdama daboolno anagu ama Apple Hrealthm ama Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo. Haddii aad hesho mid ka mid ah adeegyadan, waxaa laga yaabaa inaad bixiso biilka. Wac Community Health Plan of Washington (Qorshaha Caafimaadka Bulshadda ee Washington wixii su'aalaha ama arag haddii ay jirto Doorashada Dheefta Qiimaha Lagu daro ee adeega aan la daboolin. Arag hagaha Dheefahayaga Qiimaha Lagu daray wixii dheeraad ah hca.wa.gov/vab-chart.

Adeega	Xog dheeraad ah
Daawooyinka Kale	Akubanjarka, dhaqamada ku salaysan diinta, bogsashada iimaanka, daaweynta dhirta, isku daawaynta daawa dhireedka, daliiga, ama daaweynta daliiga.
Toosinta laf dhabarka ee Daryeelka Dadka weyn (21 iyo wixii ka weyn)	
Qurxinta la doorto ama Qaliinka is qurxinta	Oo ay ku jiraan foolka oo la jiido, taatuu oo la iska qaado, ama beeridda timaha.
Cilad-sheegista iyo Daaweynta Madhalaysnimada, Dareen la'aanta, iyo cilladda galmada	
La-talinta Guurka iyo Daaweynta Galmada	
Qalabka aan dawaynta ahayn	Sida jaranjarooyinka ama wax ka bedelida guriga.
Waxyaabaha raaxada qof ahaandeed	
Baaritaanka Jirka ah ee looga baahan yahay shaqada, caymiska, ama shatheynta	

Adeega	Xog dheeraad ah
Adeegyada ay ogolaadeen sharciga federaalka ama gobolka iyo dhulalkeeda iyo lahaanshaha	Maraykanka Dhulalka waxaa ku jira: <ul style="list-style-type: none"> • Boorta Riico • Guwaan • Maraykanka Virgin Islands • Jasiiradaha Waqooyiga Marian • Ameerikaan Saamow
Adeegyada laga bixiyo Dibadda Mareykanka	
Adeegyada Yaraynta iyo Xakamaynta Miisaanka	Dawooyinka miisaanka dhimista, badeecada, xubnimada jiiimka, ama qalabka dhimista miisaanka.

Helida macluumaadkaaga caafimaadka Haddii aanad ku faraxanayn adeeg bixiyahaaga, qorshaha caafimaadka, ama qayb kale oo daryeelka ah

Adiga ama wakiilkaaga haysta ogolaanshaha waxaad xaq u leedihiin inaad dacwad gudbisaan. Tan waxaa lagu magacaabaa tabasho. Waxaan kaa caawin doonaa inaad gudbiso tabasho. Si loo soo xareeyo cabasho, naga soo wac lambarkan 1-800-440-1561 (TTY: 711) ama warqad u qor:

1111 3rd Ave, Suite 400,
Seattle, WA 98101

Tabashooyinka ama cabashooyinka waxay ku saabsan yihiin:

- Dhibaato ka jirta xafiiska dhakhtarkaaga.
- Inaad biil ka hesho dhaqtarkaaga.
- In lagu diro uruurinta biil caafimaad oo aan la bixin darteed.
- Tayada daryeelkaaga ama sida laguula dhaqmay.
- Adeegan waxaa bixiyay dhakhtarada ama qorshaha caafimaadka.
- Dhibaatooyin kasta oo kale oo aad ka heli karto daryeel caafimaad.

Waa inaan kugu ogeysiinaa taleefan ama warqad inaan helnay tabashadaada ama cabashadaada laba maalmood oo shaqo gudahood. Waa inaan sida ugu dhaqsaha badan wax uga qabannaa welwelkaaga laakiin ma qaadan karno wax ka badan 45 maalmood. Waxaad ka heli kartaa nuqul bilaash ah siyaasadeena cabashada adoo na soo wacaya.

U doo daha Caafimaadka Dhaqanka (hore loogu yeedhi jiray U doodaha Dadka)

Qaraanka Caafimaadka Dhaqanku waa qof la heli karo inuu ku bixiyo caawimaad bilaash ah oo qarsoodi ah ee xalinta tabashooyinka la xiriira adeegyadaada habdhaqanka caafimaadka. Waxay kaa caawin karaan xalinta walaacyadaada haddii aad qabto cabashada dhaqanka caafimaadka, rafcaan, ama dhegaysiga xaqa ah. U doodaha Caafimaadka Dhaqanka ayaa ka madax banaan qorshahaaga caafimaadka. Waxaa bixiya qof soo qabtay adeegyo caafimaad hab dhaqan, ama qof xubin qoyskiisa ah uu soo maray adeegyo caafimaad hab dhaqan ah.

Adeegso lambarrada taleefannada ee hoose si aa ula xidhiidho Behavioral Health Advocate gudaha aagaaga.

Kala xidhiidh dhamman gobolada 1-800-366-3103. Ama iimayl u dir xafiiska Behavioral Health Advocacy bogga info@obhadvocacy.org.

Gobolka	Gobollada	Udoodaha caafimaadka Dhaqanka
Great Rivers	Cowlitz, Grays Harbor, Lewis, Pacific, Wahkiakum	360-561-2257
Greater Columbia	Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Walla Walla, Whitman, Yakima	509-808-9790
King	King	206-265-1399
North Central	Chelan, Douglas, Grant, Okanogan	509-389-4485
North Sound	Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom	360-528-1799
Pierce	Pierce	253-304-7355
Salish	Clallam, Jefferson, Kitsap	360-481-6561
Spokane	Adams, Ferry, Lincoln, Pend Oreille, Spokane, Stevens	509-655-2839
Southwest	Clark, Klickitat, Skamania	509-434-4951
Thurston-Mason	Mason, Thurston	360-489-7505

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan diidmooyinka, rafcaannada, iyo dhageysiga maaraynta

Diidmadu waa marka qorshaha caafimaadka ka uusan oggolaan ama bixin kharashka adeeg adiga ama takhtarkaaga aad weydiisateen. Markii aan diidno inaan kuu qabano adeeg, waxaan kuu soo diri doonnaa warqad kuu sheegaysa sababta aan u diidnay adeegga nalaga soo codsaday. Warqadani waa ogeysiiska rasmiga ah ee go'aankeenna. Waxay kuu sheegi doontaa xuquuqdaada iyo macluumaadka ku saabsan sida loo codsado rafcaan.

Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato dib-u-eegista go'aanka haddii aad u malaynayso inuusan sax ahayn, dhammaan macluumaadka caafimaadka lama tixgelin, ama waxaad u maleynaysaa in go'aanka ay tahay inuu qof kale dib u eego.

Rafcaanku waa markaad na weydiiso inaan dib u eegno kiiskaaga mar labaad maxaa yeelay waad diidan tahay go'aankayaga. Waxaad rafcaan ka qaadan kartaa adeeg la diiday. Waxaad soo waci kartaa ama qori kartaa si aan noo gaysiiso, laakiin waa inaad nagu wargeliso rafcaankaaga gudaha 60 maalmood jadwalka taariikhda diidmada. Waxaan kaa caawin karnaa inaad buuxiso rafcaan. Adeeg bixiyahaag, U doodaha Caafimaadka Dhaqanka, ama qof kale ayaa rafcaan kuu qaadi kara waa adiga hadaad saxiixdo oo aad dhahdo waan ogolahay rafcaanka. Waxaad haysataa 10 maalmood oo kaliya oo aad rafcaan ku qaadan kartid waa hadaad rabto iney kuu sii socoto adeeg aad heleyso inta aan dib u eegeyno go'aankeenna. Waxaan kuugu soo jawaabi doonnaa qoraal anagoo kuu sheegeyna inaan helnay dalabkaaga rafcaanka muddo 5 maalmood gudahood. Xaaladaha badankood rafcaankaaga waxaan dib u eegi doonnaa oo aan go'aan ka gaari doonnaa 14 maalmood gudahood. Waa inaan kuu sheegno haddii aan u baahanahay waqti dheeraad ah si aan go'aan u gaarno. Go'aanka rafcaanka waa in lagu gaaro 28 maalmood gudahood.

Waxaad ka codsan kartaa rafcaan hadal ah ama qoraal. U dir codsi qoran 1111 3rd Ave, Suite 400, Seattle, WA 98101, ama Fagas (206) 652-7040 ama iimayl customercare@chpw.org. Waxaan kaa caawin karnaa inaad buuxiso rafcaankaaga. Si aad u codsato rafcaanka hadalka ah, naga soo wac 1-800-440-1561 (TTY: 711).

FIIRO: Haddii eey kuu sii socoto helitaanka adeeg inta lagu guda jiro hawsha rafcaanka oo aad lumiso rafcaanka, **waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashka adeegyada aad heshay.**

Haddii ay degdeg tahay. Xaaladaha caafimaad ee deg-degga ah, adiga ama dhakhtarkaagu waxaad weydiisan kartaan rafcaan (degdeg ah) adoo na soo wacaya Haddii xaaladdaada caafimaad u baahan tahay, go'aan ayaa laga gaarayaa daryeelkaaga 3 maalmood gudahood. Si aad u dalbato rafcaankaada in la dedejiyey, noo sheeg sababta aad ugu baahan tahay go'aanka degdegga ah. Haddii aan diidno codsigaaga, rafcaankaaga waxaa dib loogu eegi doonaa isla muddooyinka kor lagu soo sheegay. Waa inaan dadaal macquul galinaa si aan ku siinno ogeysiis afka ah oo deg deg ah haddii aan diidno codsigaaga rafcaanka la dedejiyey. Waad soo qoran kartaa cabasho haddii aadan jecleysan go'aankayaga aan kaga dhigeyno codsigaada rafcaanka dagdag ah mid caadi ah Waxaanu isku deyi doonaa inaan ku soo wacno haddii aanu diidno codsigaaga rafcaanka la kordhiyay markaas waxaanu sharaxi karnaa sababta oo waxaanu wayn doonaa ka jawaabida su'aalo kasta. Waa inaan ku soo dirnaa ogeysiis qoraal ah laba maalmood gudahood kadib markii go'aanka la gaaro.

Haddii aadan ku qanacin go'aanka rafcaanka, waxaad xaq u leedahay inaad codsato inaad kulan lagu dhageysanayo arintaad la yeelato maamulka. Kulanka dhageysiga aad la yeelan doonto maamulka, garsoore sharciga yaqaan ah oo an u shaqeyn ama HCA ayaa dib u eegi doona kiiskaaga.

Waxaad haysataa 120 maalmood laga bilaabo taariikhda go'aankayaga rafcaanka si aad u codsato kulanka dhageysi aa rabto inaad la yeelato maamulka. Waxaad haysataa 10 maalmood oo keliya aad u weydiisato kulanka dhageysi maamulka haddii aad rabto inaad sii wado helitaanka adeegga lagu siinayay kahor diidmadaada.

Si loo waydiisto dhegaysiga maamule ee dacadada waxaad u baahan doontaa Xafiiska Maamulka Community Health Plan of Washington ay ku lug leedahay; sababta dhageysiga; waa maxay adeeg la diiday; taariikhda la diiday; iyo taariikhda rafcaanka la diiday. Sidoo kale, hubi inaad siiso magacaaga, cinwaankaaga, iyo lambarka taleefankaaga.

U soo gudbi codsiga dhegaysiga:

1. Xafiiska wicida ee Dhegaysiga Maamulka (oah.wa.gov) lambarka 1-800-583-8271,

Ama

2. U qoraya waraaq:

Office of Administrative Hearings
P.O. Box 42489
Olympia, WA 98504-2489

Waxaad qabsan kartaa qareen ama qof kale oo ku matala xiliga kulanka dacwad dhageysiga. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka qareen, booqo nwjustice.org ama wac khadka NW Justice CLEAR 1-888-201-1014.

Garsooraha dhageysiga dacwada aad la yeelatay maamulka ayaa kuu soo diri doona ogeysiis sharaxaya go'aankooda. Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka dhageysiga dacwada, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aanka si toos ahna aad ugu dirto Guddiga Rafcaannada ee HCA ama adoo ka codsanaya dib-u-eegista kiiskaaga ineey sameeyso Hay'ad Madaxbanaan ee Dib-u-eegista (IRO).

Waqtiga kooban oo aad heeysato waa muhiim: Go'aanka ka soo baxa dhagaysigu wuxuu noqdaa amar kama dambays ah muddo **21 maalmood** gudahood laga bilaabo taariikhda lagu soo diray jawaabta, haddii aadan qaadin wax tallaabo ah oo aad rafcaan kaga qaadanaysid go'aanka dhageysiga.

Haddii aadan ku qanacsaneeyn go'aanka dhageysiga, waxaad codsan kartaa Dib-u-eegis Madax-bannaan. Uma baahnid inaad yeelato dib-u-eegis madax-bannaan waxaana laga yaabaa inaad ka booddo tallaabadan oo aad weydiisato dib-u-eegis Guddiga Rafcaannada ee HCA.

IRO waa dib-u-eegis madax-bannaan oo uu sameeyo takhtar aan annaga noo shaqeynayn. Si aad u codsato IRO, waa inaad na soo wacdaa oo aad weydiisataa dib-u-eegis IRO 21 maalmood gudaheed ka dib markaad hesho warqadda go'aanka dhageysiga dacwadda. Waa inaad nagu siisaa wixii macluumaad dheeri ah 5 maalmood gudahood markaad weydiisato IRO. Waxaan kuu sheegi doonaa go'aanka IRO.

Wac 1-800-440-1561 (TTY 711) caawimaad. Waxaad weydiisan kartaa go'aan deg ah haddii caafimaadkaaga uu qatar ku jiro. Haddii aad codsato dib-u-eegidaan, kiiskaaga waxaa loo diri doonaa Hay'ad Dib-u-eegis Madaxbanaan (IRO) saddex maalmood shaqo gudahood. Ma aha inaad lacag ka bixiso dib u eegistaan. Waxaan kuu sheegi doonaa go'aanka IRO.

Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka IRO, waxaad weydiisan kartaa inaad hesho garsoore dib-u-eegis ku sameeya Guddiga Rafcaannada ee HCA si uu dib ugu eego dacwaddaada. Waxaad haysataa 21 maalmood bas oo aad ku weydiisato dib-u-eegista ka dib markaad hesho warqadda go'aankaaga IRO. Go'aanka garsooraha dib u eegista waa kama dambeys. Si aad u weydiiso garsoore dib u eegis inuu dib u eego kiiskaaga:

- Waac 1-844-728-5212

Ama

- Ku socoto:

HCA Board of Appeals
P.O. Box 42700
Olympia, WA 98504-2700

Xuquuqahaaga

Inta aad diwaanka ku jirto, waxaaad xaq u leedahay:

- Qaadashada go'aanada daryeelkaaga caafimaad, oo ay ka mid tahay diidmada daaweynta. Tan waxaa ka mid ah adeegyada caafimaadka jirka iyo qaab dhaqanka.
- In Lagugu wargaliyo dhammaan qaababka daaweynta ee jira, iyadoon la eegin kharashka buxaayo.
- Xulo ama beddel PCP ah.
- Fikrad labaad ka qaado adeeg bixiye kale oo ka shaqeeya barnaamijka qorshahaaga caafimaadka.
- Inaad hesho adeega waqti habboon gudhihiisa.
- Si xushmad iyo sharaf leh laguula dhaqmo. Takoorka lama oggola. Qofna lolama dhaqmi karo si ka duwan ama aan cadaalad ahayn sababo la xiriira jinsigiisa, midabkiisa, asalka dhalashadiisa, lab ama dhedig, dookha galmada, da'da, diinta, caqiidada, ama naafonimada.
- Si xor ah uga hadal daryeelkaaga caafimaad iyo welwelkaaga adiga oo aan lahayn natiijooyin xun.
- In lagu xafido macluumaadkaaga gaarka ah iyo macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga si qarsoodi ah.
- Weydiiso oo hel nuqulada diiwaanadaada caafimaad.
- Weydiiso oo halagu saxo diiwaanadaada caafimaad markii loo baahdo.
- Weydiiso oo hel macluumaad ku saabsan:
 - Daryeelkaaga caafimaad iyo adeegyada lagaa dabooli doono.
 - Jihada aad ka heleyso adeega iyo sida kiisaska loogu diro takhasusleyaasha iyo adeeg bixiyeyaasha kale.
 - Sida aan u siino adeeg bixiyeyaashaada lacagaha ku baxo daryeelka caafimaadkaaga.
 - Dhammaan qeybaha kala duwan ee daryeelka iyo sababta aad u helayso nooc gaar ah oo daryeel ah.
 - Sida loo helo caawimaad ku saabsan gudbinta cabasho ama cabasho ku saabsan daryeelkaaga ama caawimaad ku saabsan weydiinta dib u eegista diidmada adeegyada ama rafcaanka.
 - Qaab dhismeedka ha'yadeena ee isugu jira siyaasadaha iyo nidaamyada, tilmaamaha tababarka, iyo sida loogu taliyo isbeddelada.

- Hel siyaasadaha qorsheenta, faa'iidooyinka, adeegyada iyo Xuquuqda iyo Waajibaadka Xubnaha ugu yaraan sanadkiiba.
- Samee talooyin ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga adigoo ah xubin ka tirsan Community Health Plan of Washington.
- Hel liiska lambarrada taleefannada la waco xilliga dhibaataada.
- Hel caawimaad buuxinta foomamka talo siinta caafimaadka maskaxda ama caafimaadka ee horudhac ah.

Waajibaadkaada

Inta aad qoran tahay waxaad ogoshahay.

- Kala hadal adeeg bixiyeyaashaada baahiyahaaga caafimaad iyo daryeelkada caafimaad.
- In lagaa caawiyo go'aan ka gaarista daryeelkaaga caafimaad, oo ay ka mid tahay diidmada daaweynta.
- Ogow dhibaatooyinkaaga caafimaad kana qayb qaado yoolalka daaweynta ee lagu heshiiyey sida ugu macquulsan.
- Sii adeeg bixiyeyaashaada iyo Community Health Plan of Washington macluumaad dhameystiran oo ku saabsan caafimaadkaaga.
- Raac tilmaamaha adeeg bixiyahaaga ee daryeelka aad ogolaatay.
- Balamaha ilaali oo waqtiga lagu xadiday ku imoow Wac xafiiska adeeg bixiyahaaga haddii aad soo daahdo ama haddii aad baajiso ballanta.
- Sii adeeg bixiyeyaashaada macluumaadka ay ugu baahan yihiin si loo bixiyo lacagaha adeegyada ay adiga kuu fidiyaan.
- Soo qaado kaadhkaaga adeegyada ProviderOne iyo kaadhka xubinta aqoonsiga Community Health Plan of Washington dhammaan ballamahaaga.
- Wax ka baro ku saabsan qorshahaaga caafimaad iyo adeegyada la daboolayo.
- Adeegso adeegyada daryeelka caafimaadka markaad u baahato.
- U isticmaal adeegyada daryeelka caafimaadka si ku habboon. Haddii aadan sameyn, waxaa laga yaabaa inaad ka diiwaangashan tahay Barnaamijka Dib u Eegista Bukaanka iyo Isduwaha. Barnaamijkan, waxaa lagu qoondeeyey hal PCP ah, hal farmashiye, hal dhakhtar qoro walxaha la kontoroolo, iyo hal isbitaal oo loogu talagalay daryeelka aan degdegga ahayn. Waa inaad isla qorshahaas ku jirtaa ugu yaraan 12 bilood.
- U sheeg HCA haddii tirada qoyskaaga ama xaaladdaadu isbeddelayso, sida uurka, dhalashada, korsashada, cinwaanka isbeddelada, ama aad xaq u leedahay Medicare ama caymis kale.
- Cusbooneysii caymiskaaga sanad walba adoo adeegsanaya Washington Healthplanfinder wahealthplanfinder.org, oo ka soo warbixi isbeddellada ku dhaca koontadaada sida dakhliga, xaaladda guurka, dhalashada, korsashada, cinwaanka isbeddelada, iyo u-qalmiitaanka Medicare ama caymis kale.

Dardaaranada horudhaca ah

Waa maxay hagitaanka horudhaca ah??

Hagitaanka horudhaca ah wuxuu ka dhigaayaa xulashadaada daryeelka caafimaadka u qorayaa. Hagitaanka horudhaca ah wuxuu u sheegayaa dhakhtarkaaga iyo qoyskaaga:

- Waa maxay nooca daryeelka caafimaad ee aad rabto ama aadan rabin haddii:
 - Waad miyir beeshay.
 - Mar dambe ma sameyn kartid go'aannada daryeelka caafimaadka.
 - Uma sheegi kartid dhakhtarkaaga ama qoyskaaga nooca daryeelka aad rabto.
 - Waxaad dooneysaa inaad ku tabarucdo xubin(taada) geeridaada kadib.
 - Waxaad dooneysaa in qof kale uu go aan ka gaaro daryeelkaaga caafimaad haddii aadan awoodin.

Haysashada dardaaran horudhaca ah waxay ka dhigan tahay kuwa aad jeceshahay ama dhakhtarkaagu kuu samayn karo xulasho caafimaad adiga oo ku salaynaya waxaad rabto. Waxaa kajira saddex nooc oo dardaaranno horudhac ah Gobolka Washington.

1. Wakiil guud oo joogta ah oo lo qabsado daryeelka caafimaad Kani wuxuu magacaabayaa qof kale inuu kuu sameeyo go'aanno caafimaad haddii aadan awoodin inaad adigu samaysato.
2. Hagidda daryeelka caafimaad (dardaaranka nolosha). Qoraalkan qoraalka ah wuxuu dadka u sheegayaa inaad rabto daaweyn si loo kordhiyo noloshaada.
3. Codsiga ku-deeqida xubnaha.

La hadal dhakhtarkaaga iyo kuwa kuu dhow. Waad joojin kartaa hagitaanka horudhac ah waqtigaad rabto. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah annaga, takhtarkaaga, ama isbitaal ku saabsan dardaaranka hormariska. Waxaad sidoo kale sameyn kartaa:

- Weydii inaad aragto siyaasadaha qorshahaaga caafimaadka ee ku saabsan hagitaanka hormariska ah.
- Ku soo xaree cabashada Community Health Plan of Washington ama HCA haddii tilmaantaada aan la raacin.

Foomka Amarka Dhakhtarka ee Daaweynta Joogtada Nolosha (The Physician Orders for Life Sustaining Treatment, POLST) waxaa loogu talagalay qof kasta oo qaba xaalad caafimaad oo daran, wuxuuna u baahan yahay inuu gaaro go'aanno ku saabsan daaweynta nolosha sugeysa. Adeeg bixiyahaagu wuxuu isticmaali karaa foomka POLST si uu ugu matalo rabitaankaaga amarro caafimaad oo cad oo gaar ah. Si aad wax badan uga ogaato Tilmaamaha Hordhaca nala soo xirii.

Dardaaranka Hore ee Caafimaadka Maskaxda

Waa maxay dardaaranka caafimaadka maskaxda?

Dardaaranka caafimaadka maskaxda waa dukumiinti qoran oo sharci ah oo qeexaya waxaad rabto ineey dhacaan haddii dhibaatooyinkaaga caafimaadka maskaxda ay noqdaan kuwo aad u daran oo aad caawimaad uga baahan tahay dadka kale. Tani waxay noqon kartaa marka xukunkaagu xumaado iyo / ama aadan awoodin inaad si hufan ula xiriirto.

Waxay u sheegi kartaa dadka kale daaweynta aad rabto ama aadan rabin, waxayna aqoonsan kartaa qof aad siisay awood uu go'aan kaga gaadho magacaaga.

Haddii aad leedahay dardaraan daryeel caafimaad oo horudhac ah waa inaad taas la wadaagtaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka maskaxda si ay u ogaadaan waxaad rabto.

Sideen ku buuxiyaa howsha dardaaranka caafimaadka maskaxda?

Waxaad ka heli kartaa nuqul ah foomka dardaraan hormaris ah iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo buuxiyo hca.wa.gov/health-care-services-and-supports/behavioral-health-recovery/mental-health-advance-directives

Community Health Plan of Washington, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka hab dhaqanka, ama Ombuds-kaaga ayaa waliba kaa caawin kara inaad buuxiso foomka. Nala soo xiriir si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

Kahortaga Qashinka iyo Xadgudubka

Marka Khiyaanada, Qashinka iyo Xadgudubku aan wax laga qaban waxay lumisaa doolarka cashuur bixiye. Doolarkan waxaa loo adeegsan karaa daboolida faa'iidooyinka muhiimka ah iyo adeegyada Apple Health iyo adeegyada bulshada dhexdeeda. Inta aad diiwanka ku jirto waxaad joogtaa boos aad ogaan karto dhaqamada khiyaanada ama khashinka Haddii aad aragto mid ka mid ah kuwan soo socda fadlan nala soo socodsii:

- Haddii qof kuugu deeqo lacag ama alaab si taas beddelkeeda aad usiiso kaarkaaga Adeegyada ProviderOne ama haddii lagu siiyo lacag ama alaab taas oo beddelkeeda siineysid ballan caafimaad.
- Waxaad heshay sharraxaad dheefaha badeecadaha ama adeegyada aanad helin.
- Haddii aad ogtahay inuu jiro qof si been ah u sheeganaya mudnaan.
- Dhaqan kasta oo kale oo aad ku baraarugto oo umuuqda khiyaano, xadgudub ama qashin.

Haddii aad ka shakisan tahay wax isdabamarin, qashin ama xadgudub, waxaad noogu soo sheegi kartaa khadka tooska ah ama emayl, boosto ama fakis. Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad ku soo sheegto si qarsoodi ah. Si aad noogu soo sheegto khadka tooska ah booqo forms.chpw.org/report-potential-fraud. Si aad ugu soo sheegto emayl, emayl ama fakis waxaad soo dagsan kartaa "Foomka Warbixinta Khayaanada" oo adeegso warbixinta xiriirka ee ku liis gareesan foomka. Foomka waxaa laga heli karaa chpw.org/member-center/member-rights/fraud-waste-and-abuse.

Booqo HCA Fraud Prevention websaydka macluumaadka dheeraadka ah: hca.wa.gov/about-hca/other-administrative-activities/fraud-prevention

Waxaan ilaalinaa arimahaaga gaarka ah

Waxaa nalooga baahan yahay sharci ahaan inaan ilaalino macluumaadkaaga caafimaad oo aan gaar uga dhigno. Waxaan u isticmaalnaa una faafin karnaa macluumaadkaaga si aan kuugu faa'ideyno, u fulino daaweyn, lacag bixin, iyo hawlgallo daryeel caafimaad. Waxaan sidoo kale u isticmaalnaa una wadaagnaa macluumaadkaaga sababo kale awgood ee uu sharcigu ogolyahay

Macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo (PHI) waxaa loola jeedaa macluumaadka caafimaadka sida diiwaanka caafimaadka ee ay ku jiraan magacaaga, lambarkaaga xubin, ama aqoonsiyo kale oo loo isticmaalo ama lala wadaago qorshooyinka caafimaadka. Qorshayaasha caafimaadka iyo HCA waxay wadaagaan PHI sababahan soo socda:

- Daaweynta —Waxaa kujira gudbinta udhaxeysa takhtarkaaga (PCP) iyo daryeel bixiyaasha kale.
- Bixinta - Waxaan u isticmaali karnaa ama la wadaagi karnaa PHI si aan go'aanno uga gaarno bixinta lacagaha. Tan waxaa ka mid noqon kara sheegashooyinka, oggolaanshaha daaweynta, iyo go'aannada ku saabsan baahiyaha caafimaad.
- Hawlgallada daryeelka caafimaadka - Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadka dalabkaaga si aan kuu ogeysiinno barnaamij caafimaad oo aan kaa caawin kara.

Waxaan u isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa PHI-gaaga adiga oo aan ka helin oggolaansho qoraal ah xaaladaha qaarkood:

- Shaacinta macluumaadkaaga PHI xubnaha qoyska, qaraabada kale iyo asxaabtaada soke ayaa la oggol yahay haddii:
 - Macluumaadku wuxuu si toos ah ula xiriiraa qoyska ama saaxiibku inuu ku lug yeesho daryeelkaaga ama bixinta daryeelkaas; oo aad afka ahaan ku ogolaatay shaacinta ama lagu siiyay fursad aad ku diidid oo aadan diidin.

- Sharcigu wuxuu u oggolaanayaa HCA ama Community Health Plan of Washington inay adeegsadaan oo ay wadaagaan PHI-gaaga sababaha soo socda awgood:
 - Marka Xogheyaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Adamiga (DHHS) ee U. S. uu naga rabo inaan wadaagno PHI-gaaga.
 - Caafimaadka Dadweynaha iyo Badbaadada oo ay ka mid noqon karto ka caawinta hay'adaha caafimaadka bulshada si looga hortago ama loo xakameeyo cudurada.
 - Hay'adaha dowladda ayaa laga yaabaa inay u baahdaan PHI-gaaga si ay ula xisaabtamaan ama shaqooyin gaar ah u qabtaan, sida howlaha amniga qaranka.
 - Daraasad ku saabsan kiisaska qaarkood, markii ay ansixiyaan gudiga qaabilsan shuruucda ilaalinta macluumaadka gaarka ah ama guddiga dib u eegista hay'adaha.
 - Dacwadaha sharciga ah, sida jawaabta amar maxkamadeed PHI-gaaga sidoo kale waxaa laga yaabaa in lala wadaago agaasimayaasha aaska ama baadhayaasha baaritaanka si looga caawiyo inay shaqooyinkooda qabtaan.
 - Waxaa la siin karaa qolada fulinta shuruucda si looga caawiyo helitaanka tuhmane, markhaati, ama qof la'yahay. PHI-gaaga waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu la wadaago hay'adaha kale ee sharciga ah haddii aan aaminsanahay inaad noqon karto dhibbane xadgudub, dayac, ama rabshad guri.
 - U hogaansanaanta sharciyada Magdhawga Shaqaalaha.

Oggolaanshahaaga qoraalka ah ayaa looga baahan yahay dhammaan sababaha kale ee aan kor ku xusaneyn marka laga hadlaayo. Waad joojin kartaa oggolaansho qoraal ah oo aad na siisay. Si kastaba ha noqotee, joojintaada laguma dabaqi doono talaabooyinka la qaaday ka hor inta aan la sameyn kansal gareynta.

Haddii aad rabto inaad aqriso ama aad booqato macluumaadkaaga caafimaadka (PHI), buuxi oo soo celi foomka Macluumaadka Caafimaadka ee la ilaalay oo laga helo chpw.org/member-center/member-forms-tools. Waxa kale oo aad codsan kartaa nuqul ka mid ah foomka adoo wacaya Community Health Plan of Washington ee Adeegga Macaamiisha ee 1-800-440-1561 (TTY: 711).

Haddii aad rumeysan tahay inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada ilaalinta macluumaadkaaga PHI, waxaad sameyn kartaa:

- Nala soo hadal oo cabasho gudbi. Ma kaa qaadi doono wax talaabo oo adiga kaa dhan ah taas oo la xariirta gudbinta cabashada. Daryeelka aad hesho waxba iskama beddali doonaan.
- U gudbi cabasho U.S. DHHS, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah: ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf, ama u qor:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Ave SW, Room 509F, HHH Building
Washington, D.C 20201

Ama:

Wac 1-800-368-1019 (TDD 1-800-537-7697)

Fiiro: Macluumaadkani waa dulmar guud oo keliya. Waxaa nalooga baahan yahay inaan ka dhigno PHI-gaaga mid gaar ah oo aan ku siino macluumaad qoran sanadkiiba oo ku saabsan qorshooyinka ku dhaqanka sharciga ilaalinta sirta iyo PHI-gaaga. Fadlan ka tixraac Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta wixii faahfaahin dheeri ah. Waaad naga soo waci kartaa lambarka 1-800-440-1561 (TTY: 711), cinwaankayaga 1111 3rd Ave, Suite 400, Seattle, WA 98101, iimaylkayaga customercare@chpw.org, websaydkayaga chpw.org macluumaadka dheeraadka ah.



**COMMUNITY
HEALTH PLAN**
of Washington™

1111 3rd Ave, Suite 400 | Seattle, WA 98101-3207 | chpw.org

AH_MK001_Mbr_Handbook_IMC_01_2024 SOM